

Qorshaha Isbedelka Rasmiga ee Heron Gate

Eegis guud ahaaneed

Bulshooyinka Timbercreek waxay u soo gudbisay Dowladda Hoose ee Ottawa si dib loogu eego Official Plan Amendment. Codsiga Qorshaha Isbedelka Rasmiga wuxuu raadiyaa in loo oggolaado ama ogolaasho dib u horumarinta xaafadda hoyga ee Heron Gate ee 20-ka sano ee soo socota.

Qeexitaanka Goobta

Oorshaha Isbedelka Rasmiga (QIR) wuxuu saameeyaa guryaha kala ah 2851, 2848, 2881 iyo 2898 Baycrest Drive, 2820 iyo 2831 Cedarwood Drive iyo 2816 Sandalwood Drive. Goobta horumarinta waxay ku kooban tahay dhinaca waqooye ee wadada Heron Road , dhinaca bari Sandalwood Park iyo Heron Gate Mall ,dhinaca koonfur Walkley Road ,dhinca galbeedna Xarunta Bulshada ee Heron Gate iyo xaafadaha deegaanka ah.

[Location map \[PDF 144 KB\]](#)

Qiyaasta baaxadda goobta waa 21 hektar hadda waxay ka kooban tahay guryo gaagaaban, dhismooyin daaro shan qol ah ,Bargad lagu dabaasho ee banaanka ee Heron Gate iyo beerta bulshada.. Guryo saddex dabaq oo hadda laga dhisayo goobta dhinaca geeska waqooyi bari.

Codsiga oo Faahfaahsan

Codsaduhu wuxuu soo jeedinayaa inuu dhismayaasha guryaha 2861 Baycrest Drive, 2851 Baycrest Drive, 2840 Baycrest Drive, 2850 Cedarwood Drive iyo 2870 Cedarwood Drive inay sidood ahaadaan ,goobta inta hartayna laga dhiso deegaan . Dhismayaalka cusub waxay ka koobnaan doonaan guryo laba illaa 40 dabaq ah waxayna noqonayaa 5,500 qayb. Qaar ka mid ah dhismayaasha cusub ee wadada Walkley Road iyo Heron Road waxaa loo isticmaalayaa qaybta ganacsiga . Lama Burburin doono guryo danbe ilaa laga helayo guryo cusub ee goobta.

Waxaa kaloo la soo jeediyay meel dadweynaha baabuurta dhigato ee bartamaha goobta oo wadooyin isku xira Sandalwood Park iyo Heron-Walkley Park wadooyinka.

[Concept plan \[PDF 2.3 MB\]](#)

Ujeedada Qorshaha rasmiga ee wax ka bedelka goobta waa in la abuurro siyaasado gaar u ah si loo oggolaado horumarka la soo jeediyay. Qorshaha Rasmiga wax ka bedelka (OPA) waxaa ku jiri doona aragti ku saabsan goobta iyo isticmaalka dhulka, qaabka dhismaha iyo siyaasadaha danta guud ee dadweynaha.

Jadwalka

1. Waqtiga ugu horeeye ee Faallada ama Talada dadweynaha waa - Juun 20 ilaa July 18, 2019
2. Fadhiga lagu falanqeeyo ee Guddiga Dib u eegista naqshadda magaalada (ma aha tan dadweynaha) - Xagaaga 2019
3. Qorsheynta asaasiga iyo Xafladda furitaanka ee Bulshada # 1 - Xilliga Deyrta 2019
1. 4. Gudiga dib u eegista Naqshadda Magaalada oo Dib-u-eegis rasmi ah samaynaya Guddiga Dib Xilliga Dayrta - 2019
2. 5. Xafladda Furitaanka ee Bulshada # 2 - Deyrta 2019
3. 6. Kulamada Guddiga Qorsheynta iyo Madaxa Golaha deegaanka ee Magaalada – Bilowga ama horaanta sanadka 2020

Noo sheeg ra'igaaga

Waxaad ka arki kartaa dhammaan qorsheyaasha iyo daraasaadka ay Dowladda hoose ee Ottawa ka heshay qayb ka mid ah [Development Application Search Tool](#).

Waxaad soo gudbin kartaa wixii Talo iyo Tusaale ee ku saabsan codsigani:

- Iyadoo loo marayo [Habka loo Raadiyo Codsiga Horumarinta](#)
- Waxaad ku soo diri kartaa email Melanie.Gervais@ottawa.ca
- Waxaad ku soo diri kartaa FAX 613-580-2576
- Waxaad ku soo diri kartaa boostada ku socoto Mélanie Gervais, Ottawa, 110 Laurier Avenue West, Ottawa, ON K1P 1J1, Code 01-14
- Telefoon ahaan usoo diri kartaa Mélanie Gervais 613-580-2424, Ext 24025
- Kasoo qayb geli kartaa Kulanka dadweynaha oo dhacaya xilliga dayrta 2019
- Kulanka guddiga Qorsheynta oo dhacaya mustaqbalka

Fadlan wixii talo ama faallo aad ka qabto ka soo dhiib oo ku saabsan codsiga ugu danbayn maalinta **Khamiista, July 18**. Email Melanie.Gervais@ottawa.ca haddii aad jeclaan lahayd in lagu wargeliyo ama lagula socodsiiyo dhammaan taariikhda shirarka iyo go'aamada.

Dowladda Hoose ee Ottawa waxay tixgelin muhiim ah siisaa helitaanka adeegyada. Haddii aad u baahan tahay hoy ama adeeg gaar ah, fadlan u soo dir email Melanie.Gervais@ottawa.ca ama wac 613-580-2424, Ext 24025.

Codsiyada ku saabsan Qorshaynta

Ka hor inta aadan samayn ama aad sii wadin Qorshaha horumarinta, codsadhaha wuxuu kaloo u baahan doona oggolaansho qorshaynta ee Dowladda Hoose ee Ottawa, oo ay ka mid yihiin laakiin aan ku xaddidneyn kuwa Zoning By-law Amendment and Site Plan Control Marka la ogolaado Qorsha Isbedelka Rasmiga Codsiyadani waa la

soo gudbin doonaa . Dadweynaha ayaa la ogeysiin doonaa marka la soo gudbiyo waxayna heli doonaan fursad ay kaga dhiibtaan taladooda ama rayigooda ayaga.

Mélanie Gervais MCIP, RPP

Planner

Planning, Infrastructure and Economic Development Department

City of Ottawa

110 Laurier Avenue West

Ottawa, ON K1P 1J1

Email: Melanie.Gervais@ottawa.ca

Tel.: 613-580-2424, ext. 24025

Fax: 613-580-2576